

# Qaaxo

## Waa maxay Qaaxadu (TB)?

Qaaxada (TB) waxaa keena bakteeriyo (jeermis) loo yaqaanno mycobacterium tuberculosis. TB waxay inta badan ku dhacdaa sambabada qofka laakiin waxay sidoo kale saameyn kartaa qaybaha kale ee jirka sida maskaxda, kilyaha, ama lafdhabarta.

## Sidee buu u faafaa?

- Wuxuu ku faafaa hawada marka qofka qaba cudurka TB ee sambabada ama cunaha uu qufaco, hindhiso, heeso ama hadlo.
- Marka jeermiska TB uu galo jirka qofka, waxaa laga yaabaa in qofku uu qaado caabuqa TB. Caabuqa TB-da waxa uu ahaanayaa mid aan shaqaynayn (hurdaya) ilaa inta uu jidhkaagu la dagaalami karo caabuqa kana joojin kara jeermisku inuu koro. Marka uu jidhkaagu la dagaalami waayo infekshanka jeermiska TB wuu koraa oo faafaa isagoo keena cudurka TB.
- Dadka qaarkiis cudurka TB wuxuu ku dhici karaa toddobaadyo gudahood marka ay hawada ka neefsadaan jeermiska TB. Dad kalena waxaa laga yaabaa inay ku jirradaan sanado kadib marka hab difaaca jidhkoodu uu u daciifo sabab kale.

## Waa maxay faraaqa u dhexeeya caabuqa TB iyo cudurka qaaxada?

### Waa maxay caabuqa TB?


Jeermiska TB ayaa ku jira jirkaaga laakiin lama aadan xanuunsan.

Dadka qaba caabuqa TB:

- Ma lahan astaamo jirro
- Ma dareemaan jirro
- Kuma faafin karaan jeermiska dad kale
- Waxaa laga yaabaa inuu cudurka TB ku dhaco haddii aan laga daaweyn caabuqa TB

Way sahlan tahay in la daaweeyo caabuqa TB.

In la qaato daawada caabuqa TB waxay ka hortagtaa in TB-du korto kadibna sababto cudurka TB.




### Waa maxay cudurka TB?

Jeermiska TB ayaa koraya kuna faafaya jirka.

Dadka qaba cudurka TB:

- Waxay qabaan astaamo ay ka mid yihiin:
  - Qufac raaga oo gaara laba usbuuc iyo ka badan
  - Xabadka oo xanuuna
  - Qufaca dhiig ama xaako
  - Daciiftinimo ama daal
  - Miisaan hoos u dhaca
  - Cunto xumo
  - qarqaryo
  - qandho
  - dhidid habeen
- caadiyan la dareemaa jirro
- laga yaabaa in jeermiska TB ku faafiso dad kale.
- waxaa loo baahan yahay daawo si loo aaweeyo cudurka



## Sidee lagu ogaadaa TB?

### Cudurka TB

- Haddii dhaqtarkaagu kugu maleeyo inaad cudurka TB qabto waxaa laga yaabaa:
  - Kuu dalbo in lagaa baaro xaakada si loo eego in jeermiska TB ku jiro sambabadaada.
  - Kuu diro raajito xabad si loo ogaado haddii uu jiro dhaawac ka soo gaaray sambabka TB.
  - Kaa qaado muunad unug (biopsy) si loo arko in TB kaaga jirto xubno kale oo jirka ah.
- Haddii baaritaannadaan sheegaan wax lagaa helay waxaa laga yaabaa inaad qabto cudurka TB.

### Caabuqa TB

- Haddii dhakhtarkaagu u maleeyo inaad qabto infekshanka TB wuxuu dalban doonaa
  - Baadhitaan maqaarka ah (TST) ama baadhitaan dhiig oo lagu magacaabo IGRA (Interferon–Gamma Release Assays).
- Haddii baadhitaanka maqaarka ama dhiigga natiijadu noqoto in wax jiraan, taas macnaheedu waxaa weeye jeermiska TB ayaa ku jira jidhkaaga waxaadna qabtaa caabuqa TB.
- Xusuusnow in dadka qaba caabuqa TB ay fiyoobi dareensan yihiin astaamo jirro ahna aysan ka muuqan.

### Sidee loo daaweeyaa?

- TB waxaa lagu daaweeyaa daawo (antibiotics).
- Dadka qaba caabuqa TB waxay qaataan hal daawo muddo ah 4-9 bilood.
- Qaadashada daawada caabuqa TB waxay ka joojisaa jeermiska TB inuu u beddelmo cudurka TB.
- Dadka qaba cudurka TB waxaa lagu daaweeyaa 4 ama ka badan oo daawooyin kala duwan ah muddo 6-12 bilood ah ama ka dheer.
- Dhammaan daawooyinku waa bilaash waxaana bixiya qaybta caafimaadka dadweynaha ee degaanka.
- Kalkaaliyaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku taageeri doona muddada daaweyntaada.

### Haddii ay kula tahay inaad qabt cudurka TB:

- Joog guriga kana fogow dadka kale.
- Wac takhtarkaaga qoyska ama tag rugaha caafimaadka ee furan.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan TB, fadlan la xiriir takhtarkaaga ama la hadal kaakaalisada caafimaadka dadweynaha adigoo wacaya lambarka 905-546-2063.

